



SPRÅKLUST

# WAX WADA AKHRIS



Detta är en översättning till **SOMALISKA** av "Läs tillsammans"

# WAX WADA AKHRIS



Raadinta buuggaagta iyo in aad si wadajir ah u wada akhrisaan adiga iyo ilmahaaga waa qaabka ugu fiican ee aad u wada qaadan kartaan wakhtiga. Sidoo kale waa fursad wanaagsan oo aad kuwada hadashaan. Buuggaagta, sheekooyinka iyo wax akhrintu waxay kor u qaadayaan horumarka luuqadda caruurta. Wax akhrintu waa fursad ay caruurta ku isticmaalaan khayaalkooda, hal-abuurka iyo ka fiirsashada, iyo waana qaabka lagu barto ereyo cusub.

## MID AAN SIDAASI U ADKAYN




Dooro buugg ku habboon heerka luuqadda ilmahaaga iyo xiisahiisa. Waxaad buuggaag ka amaahsan kartaa maktabadaada. Waa kuwo lacag la'aan ah shaqaalaha meesha joogana farxad bay u tahay in ay adiga ku caawiyaan!

## ISTICMAAL ADIGA EREYADAADA



Ku sheeg sheekada adiga ereyadaada khaaska ah iyo luuqadaada gaarka ah adiga oo u isticmaalaya sawirada caawimaad ahaan. Kuxir sheekada khibradaha iyo waxa uu ilmahaaga la kulmo. Midaasi waxay kadhigaysaa in uu ilmahaaga si fudud ula qabsado buugga.

## WANAAGSAN OONA WACAN




Isku day in aad heshid wakhti aad wax ku akhrisid maalin kasta. Dooro wakhti aad degantahay oona nasantahay islamarkaasna jirin cid ku carqaladaysa. U fadhiiso si raaxo leh u lana soco si jir iyo aragti ahaan ilmahaaga. Diiradda saar buugga iyo sheegida sheekada, hana u oggolaanin in wax kale ay idiin kasoo kala dhexgalaan. Ilmahaaga wuxuu jacelyahay dhagaysiga codkaaga, xitaa haddii aad u malaysid in aadan u akhriyaynin si wanaagsan.




## TUSI SAWIRADA

U tilmaan sawirada ugu muhiimsan ee xiriirka la leh qoraalka intiiba aad sheegaysid sheekada. Midaasi waxay kucaawinaysaa ilmahaaga in uu diirada saaro waxa ugu muhiimsan qoraalka. Ilmahaaga way u fududaanaysaa in uu fahmo uuna lasocdo sheekada.



## XOR U AHAAW IN AAD KABADBADISID SHEEKADA

Haka cabsanin in aad matashid sheekada marka aad akhriinaysid. Xor u ahaaw in aad isticmaashid codadka, muuqaalka wejiga iyo dhaq-dhaqaaqa. Kabadbadi mowjada codka, istaag (gaar ahaan kahor meelaha layaabka leh) kadibna matalaad kusamee waxyaabaha qoran. Kucayaar codkaaga – kadhig mid aad-usareeya ama qoto dheer si aad u muujisid jilayaasha sheekada kujira. Midaasi wuu jeclaan doonaa ilmahaaga waxaadna kusoo jiidaysaa ihtimaamkiisa.



## U OGGOLOOW ILMAHAAGA IN UU KUSOO BIIRO

U oggoolow in uu ku hago rabitaanka iyo xawliga ilmahaaga sida aad u akhriid buugga.

Diirada saar waxa uu ilmahaagu kutusinayo in uu jacelyahay, sida sawirada, kadibna kadhig kuwaasi hadal. Qaado wakhtigaaga si aad u qabatid ereyada ilmahaaga, dhaq-dhaqaaqiisa iyo codkiisa.

## U SHEEGGA SHEEKADA SI WADA JIR AH

Marka aad akhriid buugga dhowr jeer, waxaad isticmaali kartaa sawirada si aad isugu sheegtaan sheekada si wada jir ah una xasuusataan waxa uu buuggu kusaabsanyahay.





Biblioteksutveckling och Barnhälsovården  
i Region Jönköpings län samarbetar med  
länets folkbibliotek och logopedier för att  
ge alla barn Språklust!

